**FOOMKA OGGOLAANSHAHA INTERNET EE QAANGAARKA (Da'da 16+) V8 03.10.20**

**Magaca Daraasadda: Ilaalada Fayruska**

Fadlan sax ku calaamadee H/M

1. Waxaan anigu xaqiijinayaa in aan akhriyey xaashida macluumaadka ku taariikhaysan 03.10.2020 (Nuskhadda 8) ee loogu talagalay daraasadda sare. Waxaan fursad u helay in aan macluumaadka ka fiirsado, su'aalo jeediyo waxaana kuwan la iiga jawaabay si loogu qanco. ☐

2. Waxaan anigu fahansan ahay in aan ikhiyaar u leeyahay ka qaybqaadashada oo aan xor u ahay in aan ka baxo waqti kaste anigoo aanan sabab bixinin, taasoo aanan saamaynayn daryeelkayga caafimaadka ama xuquuqdayda sharciyeed. ☐

3. Waxaan anigu oggolahay in UCL ay lambarkayga NHS, magacayga, jinsigayga, cinwaankayga iyo taariikhdayda dhalashada la wadaagto ururrada NHS Digital iyo Caafimaadka Dadweynaha ee England (Public Health England). ☐

   *Ururka NHS Digital waxuu hayaa xogta ku saabsan booqashooyinka iyo jiifimaha isbitaalka (oo lagu magacaabo xogta Tirakoobka Dhacdooyinka Isbitaalka) iyo dhimashooyinka, waxuuna ururka Caafimaadka Dadweynaha ee England hayaa xogta baaritaanka fayruska ee si caadi ah loo guro xataa xogta ka timaadda barnaamijka Baarista iyo Raadinta ee NHS (NHS Test and Trace). Waxaan anigu fahansan ahay in macluumaadka lagu hayo qaybaha xogta ee habboon ayna ururradani maamulaan loo isticmaali karo si loogu bixiyo macluumaadka ku saabsan jiifimahayga isbitaalka iyo natiijooyinkayga baaritaannada fayruska ee lagu qabto adeegga NHS (Adeegga Caafimaadka Qaran) gudihiisa. Waxaan anigu fahansan ahay in xogtan loo isticmaali doono oo keliya ujeeddooyinka tirakoobka iyo cilmibaarista.*

4. Haddii reerkayga loogu marti qaado in ay ka qayb qaataan qaybta suufka la mariyo sanka iyo dhiigga la qaado ee ka mid ah daraasadda, waxaan anigu oggolahay in UCL macluumaadka dadka lagu garto ee aniga igu saabsan ay la wadaagto shirkadda xammuulka si la iskugu geeyo qalabka daraasadda ama baaritaanka oo loogu soo diro reerkayga, la wadaagto shirkadda dhiigga qaadda/ama kalkaaliyaha cilmibaarista adeegga NHS si loo qorsheeyo ballanta qaadista dhiigga, ayna la wadaagto shaybaarka si loogu soo saaro calaamadaha barkood ee muunadda oo aniga la iigu soo sheego natiijooyinka baaritaanka. ☐

Haddii aad weydiimo qabto, fadlan la xiriir Maamulaha Mashruuca (Project Manager) ee Ilaalada Fayruska ee UCL: viruswatch@ucl.ac.uk
1-19 Torrington Place, Fitzrovia, London  WC1E 7HB

*(Macluumaadka dadka lagu garto waxaa ka mid ah: magaca, taariikhda dhalashada, jinsiga, cinwaanka, telefoonka, iimaylka)*

5. Waxaan anigu oggolahay in aan iska qaado suufka la mariyo sanka/cunaha haddii kooxda daraasaddu ay aniga taas iigu marti qaadaan. ☐

6. Waxaan anigu oggolahay in aan bixiyo labo muunad ama qayb dhiig, hal xagaaga sanadka 2020 iyo hal guga sanadka 2021 haddii taas la iigu marti qaado. ☐

7. Waxaan anigu oggolahay in aan bixiyo baaritaanka unugyada difaaca jirka ee mudista farta haddii aanan bixin karayn muunadda buuxda ee dhiigga. ☐

8. Waxaan anigu oggolahay in aan bixiyo baaritaanka unugyada difaaca jirka ee mudista farta haddii kooxda daraasaddu ay aniga taas iigu marti qaadaan.
    a. Hal jeer waqtiga qaadista dhiigga dhammaystiran ☐
    b. Hal muunad ama qayb 14 maalmood ka dib marka qof reerkayga ka mid ah laga helo cudurka COVID-19. ☐

9. Waxaan anigu oggolahay in muunadaha dhiigga iyo suufafka sanka la mariyo ee cilmibaaristan loo qaado lagu kaydiyo magac la'aan (ka dib dhammaadka daraasaddan) si loogu isticmaalo cilmibaarista mustaqbalka suurogal ah in lagu sameeyo caabuqyada neefsashada, jawaabcelinta nidaamka difaaca dabiiciga ah ee jirku uu ka bixiyo caabuqyadan iyo raadyada hiddesideyaashu ay kuwan ku reebaan. ☐

10. Waxaan anigu oggolahay in aan telefoonkayga ku soo dejisto Abb-ka ama barnaamijka telefoonka gacanta ee raadraacidda dhaqdhaqaaqa ee lagu magacaabo "Tracker for ArcGIS" iyo in UCL ay macluumaadkayga isticmaalaha (magaca koowaad, magaca qoyska, iyo cinwaanka iimayl) ku rarto rukumashada internetka ee ArcGIS (oo lagu hayo kaydiye Waqooyi Maraykan) si loogu habeeyo akownkayga ama boggayga abb-ka raadraacidda. Shaqaale tiro yar oo ka magacaaban shirkadda ESRI (shirkadda maamusha abb-ka raadraacidda ArcGIS) ayaa weliba eegi kara macluumaadkayga isticmaalaha iyadoo ujeeddada keliya ee laga leeyahay ay tahay in kooxda daraasadda UCL laga taageero dhisidda ama abuuridda akownkayga abb-ka raadraacidda. Xogta goobta la joogo ee uu guro abb-ka raadraaciddu iyo cinwaankayga iimayl waxaa laga gudbin doonaa telefoonkayga waxaana loo gudbin doonaa kaydiye xiran oo ay leedahay shirkadda EU Amazon oo kooxda daraasadda UCL ayaa si joogto ah ugu soo dejin doona Hoyga Nabadda Xogta (Data Safe Haven) halkaasoo loogu yeeli doono magaac been been ah iyadoo aragga ama isticmaalka si adag loogu xadayn doono cilmibaareyaasha magacaaban. Shaqaale tiro yar oo ka magacaaban shirkadda ESRI ayaa eegi kara xogtayda goobta la joogo ee magaac been been ah loo yeelay ee ku jirta Hoyga Nabadda ☐

Xogta si kooxda daraasadda UCL looga taageero falanqaymaha dhulka iyo bannaanka ee horreeya.

*Abb-kani waxuu diiwaangeliyaa goobta telefoonnada gacanta waxuuna ku daaran yahay dhanka dambe waxuuna isticmaalaa tilmaamaha GPS ee telefoonka iyo u dhawaanshaha goobaha internetka bilaa xarig ah ee wi-fi iyo nidaamka bulutuuf. Abb-ku waxuu bixin doonaa macluumaad qiime leh oo lagu fahmo sida uu cudurka COVID-19 u faafo laakiin waxaad weli ka qayb qaadan kartaa Ilaalada Fayruska xataa haddii aad doorato in aadan abb-ka soo dejisanin.*

11. Waxaan anigu fahansan ahay in macluumaadka la guro ee aniga igu saabsan ay UCL kaydin doonto ugu yaraan 10 sano oo magac la'aan lagula wadaagi karo cilmibaareyaasha kale ee cilmibaarista mustaqbalka ka dib marka ay daarasaddani dhammaato. ☐

12. Waxaan anigu fahansan ahay in qaybaha habboon ee xogtayda (magaca laga saaray) ee la guro waqtiga daarasadda, ay eegi karaan shakhsiyaad ka socda UCL, ama masuuliyiinta nidaaminta, marka ay taasi ku habboon tahay ama muhiim u tahay ka qaybqaadashadayda cilmibaaristan. Waxaan anigu rukhsaynayaa in shakhsiyaadkani ay eegaan xogtan. ☐

13. Waxaan anigu fahansan ahay in booskoodkayga (oo laga saaray macluumaadka kale ee shakhsi ahaaneed) ay falanqayn karaan xubno magacaaban oo ka mid ah shaqaalaha shirkadda ESRI (shirkadda falanqaynta juqraafiyeed ee UCL ka taageeraysa mashruucan). Waxay shaqaalahani ku shaqayn doonaan heshiisyo sir ilaalin adag. ☐

14. Waxaan anigu oggolahay in aan ka qayb qaato daraasadda kor ku xusan. ☐

15. Waxaan anigu oggolahay in ay cilmibaareyaasha UCL igala soo xiriiraan daraasadaha mustaqbalka. Waxaan anigu fahansan ahay in aanay tani ka dhignayn in ay waajib igu tahay in aan ka qayb qaato daraasadda mustaqbalka, waxay tahay uun in aanan dhib ka qabin in la ila soo xiriiro. ☐

---

***MIYAAD LEEDAHAY CARRUUR/MASUUL KA TAHAY CARRUUR KA YAR 16 JIR OO REERKAAGA DEGGAN? HADDII HAA…***

Fadlan sax ku calaamadee H/M

1. Waxaan anigu oggolahay in UCL ay lambarka NHS, magaca, jinsiga, cinwaanka iyo taariikhda dhalashada ilmahayga/carruurtayda la wadaagto ururrada NHS Digital iyo Caafimaadka Dadweynaha ee England. ☐

*Ururka NHS Digital waxuu hayaa xogta ku saabsan booqashooyinka iyo jiifimaha isbitaalka (oo lagu magacaabo xogta Tirakoobka Dhacdooyinka Isbitaalka) iyo dhimashooyinka, waxuuna ururka Caafimaadka Dadweynaha ee England hayaa xogta baaritaanka fayruska ee si caadi ah loo guro xataa xogta ka timaadda barnaamijka Baarista iyo Raadinta ee NHS (NHS Test and Trace). Waxaan anigu fahansan ahay in macluumaadka lagu hayo qaybaha xogta ee habboon ayna ururradani maamulaan loo isticmaali karo si loogu bixiyo macluumaadka ku saabsan booqashooyinka iyo jiifimaha isbitaalka iyo natiijooyinka baaritaannada fayruska ee ilmahayga/carruurta ee lagu qabto adeegga NHS gudihiisa. Waxaan anigu fahansan ahay in macluumaadkan xogta loo isticmaali doono oo keliya ujeeddooyinka tirakoobka iyo cilmibaarista.*

2. Waxaan anigu oggolahay in aan ilmahayga ka qaado suufka la mariyo sanka/cunaha haddii kooxda daraasaddu ay aniga taas iigu marti qaadaan. ☐

3. Waxaan anigu oggolahay in ilmahaygu uu bixiyo labo muunad ama qayb dhiig, hal xagaaga sanadka 2020 iyo hal guga sanadka 2021 haddii taas lagu marti qaado. *Muunadda dhiigga ee la bixiyo waxay macluumaad qiime leh naga siin doontaa cudurka COVID-19 laakiin waxuu ilmahaagu weli ka qayb qaadan karaa daraasadda haddii uusan rabin in uu dhiig bixiyo.* ☐

4. Waxaan anigu oggolahay in ilmahaygu uu bixiyo baaritaanka unugyada difaaca jirka ee mudista farta (haddii kooxda daraasaddu ay taas ku marti qaadaan) haddii uusan rabin in uu muunad dhiig bixiyo. ☐

5. Waxaan anigu oggolahay in ilmahaygu uu bixiyo baaritaanka unugyada difaaca jirka ee mudista farta haddii kooxda daraasaddu ay taas ku marti qaadaan.

    a. Hal jeer waqtiga qaadista dhiigga ☐
    b. Hal muunad ama qayb 14 maalmood ka dib marka qof reerkayga ka mid ah laga helo cudurka COVID-19. ☐

6. Waxaan anigu oggolahay in muunadaha dhiigga iyo/ama suufafka la mariyo sanka ee ilmahayga looga qaado cilmibaaristan lagu kaydiyo magac la'aan (ka dib dhammaadka daraasaddan) si loogu isticmaalo cilmibaarista mustaqbalka suurogal ah in lagu sameeyo caabuqyada neefsashada, jawaabcelinta nidaamka difaaca dabiiciga ah ee jirku uu ka bixiyo caabuqyadan iyo raadyada hiddesideyaashu ay kuwan ku reebaan. ☐

Haddii aad weydiimo qabto, fadlan la xiriir Maamulaha Mashruuca (Project Manager) ee Ilaalada Fayruska ee UCL: viruswatch@ucl.ac.uk
1-19 Torrington Place, Fitzrovia, London WC1E 7HB

7. Waxaan anigu fahansan ahay in macluumaadka la guro ee ilmahayga ku saabsan ay UCL kaydin doonto ugu yaraan 10 sano oo magac la'aan lagula wadaagi karo cilmibaareyaasha kale ee cilmibaarista mustaqbalka ka dib marka ay daarasaddani dhammaato. ☐

8. Waxaan anigu fahansan ahay in qaybaha habboon ee xogta ilmahayga ee magaca laga saaray ee la guro waqtiga daarasadda, ay eegi karaan shakhsiyaad ka socda UCL, ama masuuliyiinta nidaaminta, marka ay taasi ku habboon tahay ama muhiim u tahay ka qaybqaadashadiisa cilmibaaristan. Waxaan anigu rukhsaynayaa in shakhsiyaadkani ay eegaan xogta magaca laga saaray ee ilmahayga. ☐

9. Waxaan anigu fahansan ahay in booskoodka ilmahayga (oo laga saaray macluumaadka kale ee shakhsi ahaaneed) ay falanqayn karaan xubno magacaaban oo ka mid ah shaqaalaha shirkadda ESRI (shirkadda falanqaynta juqraafiyeed ee UCL ka taageeraysa mashruucan). Waxay shaqaalahani ku shaqayn doonaan heshiisyo sir ilaalin adag. ☐

10. Waxaan anigu oggolahay in ilmahaygu uu ka qayb qaato daraasadda kor ku xusan. ☐

Haddii aad weydiimo qabto, fadlan la xiriir Maamulaha Mashruuca (Project Manager) ee Ilaalada Fayruska ee UCL: viruswatch@ucl.ac.uk
1-19 Torrington Place, Fitzrovia, London WC1E 7HB